

# Tilmaamaha qofka soo baaqanaya isbitaalka iyo rugta caafimaadka

Si loo ilaaliyo caafimaadka iyo badqabka bukaankeena iyo shaqaalaheena, Allina Health waxay aasaastay xeerka **booqasho lama ogola** dhammaan xurumaha oo dhan. Waxaa jira qeyb laga soo reebay xeerkaan kuwaasoo halkan hoose lagu sii caddeeyay.

## Shuruudaha booqdaha

- Soo booqdeyaasha waxaa laga baari doonaa astaamaha la midka ah COVID-19 waana iney ka gudbaan baaritaanka si loogu ogolaado inay soo booqdaan.
- Soo booqdeyaasha waa inay mar kastoo ay xurunta joogaan xirnaadaan calaamad lagu aqoonsanayo booqdaha, qalab ilaalin shaqsiyeed iyo iyadoo laguugu dhajiyo caalamad cadeyn in baaris lagu mariyay.
- Soo booqdeyaasha waa inay si joogto ah u isticmaalaan nadaafadda gacmaha inta ay ku jiraan xarunta.
- Soo booqdeyaasha waa inay booqdaan qolka bukaanka oo keliya oo aaney aadin goobaha kale ee xarunta.

## Waaxda Gurmada

Soo booqdeyaasha waxaa loo oggolaan doonaa inay ku soo booqdaan waaxda gurmada bukaanada leh xaaladaha soo socda.

- Bukaanada carruurta ah- hal waalid / ilaaliye ayaa qolka bukaankiiba loo ogolaanayaa.
- Dadka waaweyn ee jilicsan / itaalka daran - Hal booqde oo qof weyn ah / ilaaliye ayaa qolka bukaankiiba loo ogolaanayaa.
- Dhaawaca / bukaanka daryeelka halista ah - Hal booqde oo qof weyn ah ayaa qolka bukaankiiba loo ogolaanayaa.
- Dhammaan bukaanada kale waxay lahaan karaan hal ruux oo mas'uul ka ah inuu ku sugo goobta la fadhiisto, waana loo oggolaan doonaa inuu soo booqdo bukaanka sideey ugu xilsaareen kooxda daryeelku iyadoo la tixgalinayo xaalada bukaanka

## Bukaanada dhaqtarka jiifa

Soo booqdeyaasha waxaa loo oggolaan doonaa oo kaliya bukaanada la dhigay isbitaalka ee leh xaaladahaan soo socda. Wax kastoo ka baxsan liiskan waa inuu oggolaadaa kormeeraha koobta

- Bukaanaada carruurta ah- Hal waalid / ilaaliye ayaa qolka bukaankiiba loo oggolaan doonaa. Waalidka / ilaaliyaha ayaa la joogi kara habeen iyagoo raacaya sharuuda caadiga ah.
- Bukaanaada foosha iyo dhalidda - Hal booqde oo loo xushay ayaa loo ogolyahay bukaan kastaa oo umulaya halkii joogitaan.
  - Doulada( dumarka caawiya foosha iyo dhalmada) booqaneysa bukaanka **ayaa** noqon midda keliya ee soo booqaneysa bukaankaas.
  - Ilmaha dhashay looma ogola soo booqdayaasha dibada ka imanaya, haddii eysan jirin tixgelineyn xaalad oo gaar ah.
  - Waxbadan ka baro [tilmaamaha qofka kugu taageeraya fooshaada iyo dhalmadaada](#).
- Ilmaha dhashay - Lamaanaha/ daryeelaha koowaad ayaa loo oggolaan doonaa inay soo booqdaan.
- Daryeelka bukaanka oo naxariis leh - Tani waxaa ka mid ah bukaanka noloshiisa sii dhammaaneyso, bukaanaada xaaladoodu deganayn iyo bukaanaada qaliinka maraya.
  - Qeybaha Daryeelka halista ah: Si looga hortago khatarta sii kordheysa ee bukaanka iyo shaqaalaha qeybahaan, bukaanaada ay xaaladoodu deganayn oo kaliya ayaa loo ogol yahay in la soo booqdo waqtigan.
  - Maareeyaha daryeelka bukaanka ama qofka loo wakiishay ayaa go'aan ka gaadhi doona.
  - Baahida daryeelka ruuxiga ah: Fadlan la shaqee kooxaha daryeelka ruuxiga ah si aad si ammaan ah ula qabato baahiyaha daryeelka ee ruuxiga ah
- Bukaanka Caafimaadka Dhimirka – lama soo booqan karo. Bukaanka iyo carruurta qaangaarka waxay yeelan karaan hal waalid / ilaaliye. Bukaanka da'da-weyn ee qaba cudurka dhimirka waxay lahaan karaan ilaaliye.

## Qorshaynta waxa loo baahanyahay baxista

Allina Health waxay aqoonsan tahay in adeegaha daryeel ee bukaanka u baahan karo inuu joogo si uu uga caawiyo diyaarinta ka bixidda isbitaalka. Qorsheynta bixitaan habboon oo ammaan ah waa muhiim si loo dhowro badqabka bukaannada, sidaa darteed, xeerta booqasho lama ogola loogama jeedo in lagu hakiyo hannaanka bixitaanka.

- Hal qof ayaa bukaankiiba loo ogolyahay qaybtaan si uu uga caawiyo diyaarinta ka bixidda.
- Maamulaha daryeelka bukaanka ama qofka loo wakiishay ayaa loo ogolaan doonaa inuu sameeyo go'aanno ku saabsan goorta iyo cidda daryeelaha u joogi doona.
- Guud ahaan, u diyaargarowga bixidda uma baahna inuu dhaco ka hor maalinta laga saarayo isbitaalka.

## Bukaanada Rugta Caafimaadka Allina

Si loo ilaaliyo bukaanadeena iyo shaqaalaheenna, booqdeyaasha waxaa loo ogol yahay oo keliya sida ku xusan shuruudaha soo socda:

- Bukaanka ka yar 18 sano waxaa keeni kara hal waalid / mas'uul sharci ah, ama
- Soo booqdaha waa inuu noqdaa adeegaha daryeelka shakhsi ahaaneed oo loogu talagalay bukaanada u baahan caawimaad ballantooda

IYO

- Ma yeelan karo astaamo u eg hargab, oo ay ku jiraan qufac, qandho ama walaac xagga neefsashada ah
- waa in uu ka weyn hayay 18 sano (looma ogola caruur inay soo booqdaan).